



NAMNUUCIDA GURI KASAARIDA

DADKA KIRAYSTAYAASHA AH MUDDO KOOBAN

In dadka guryaha ay dagan yihiin laga saaro ayaa si ku meel gaar ah looga mamnuucay Washington **illaa laga gaaro Juun 4teeda, ama kadib haddii xaalada degdeg ah sii socoto**, sida ku cad amarka gudoomiyaha Gobalka Inslee cudurka COVID-19 awgiis.



Wali qasab miyay igu tahay inaan baxiyo kiradayda?

Haa. Laakiin haddii aadan awoodin inaad kiradaada iska dhiibto sabab la xariirta saamaynada dhaqaalaha ee cudurka COVID-19 waa in mulkiilaha guriga aad dagan tahay kaala shaqeeyo qorshe lacag bixin oo ku dhisan xaaladaha qaaska ah ee jira.

Mulkiilaha gurigaygu ma kordhin karaa kiradayda?

Maya, mulkiilaha guriga aad dagan tahay ma kordhin karo kirada ama lacagta damaanada kaaga taala ilaa amarka mamnuucida guri kasaarku dhammaanaayo.

Ma la igu xukumi karaa lacag dheeraad ah inaan kirada xiligeeda ku bixin waaway awgeed?

Maya. Lacagta ganaaxa kiro lasoo daaha lama oggola intay socoto muddada la mamnuucay guri kasaarida dadka. Mulkiilkaaha gurigaagu ma codsan karo kiro uu kugu leeyahay asagoo adeegsanaaya dadka daynta aruursha ama kuma hanjabi karo inuu sidaas yeelo.



Ma tahay inaan arintaan kala hadlo mulkiilaha guriga aan daganahay?

Haa! Sii wad inaad xariir la samayso mulkiilaha gurigaaga. Mulkiilahaagu wuxuu u baahan doonaa inuu u diyaar garoobo saamaynta helitaan la'aanta lacagta kirada kasoo gali jirtay.



Guriga ma la iga saari karaa inta lagu jiro amarka xanibaada?

Kaliya haddii aad khatar muuqata ku tahay caafimaadka iyo badqabka dadka dariska ah iyo/ama mulkiilaha guriga.



Xagee ayaan ka helayaa caawimaad haddii aan helo Ogaysiiska 14 maalmod ah ee **Bixi kirada ama Guur** ama ogaysiis kale oo guriga la iiga saaraayo intay socoto amarka mamnuucida guri ka saarka?

La xariir Renting in Seattle Helpline (206) 684-5700 ama cabasho oonleen ah ku gudbi <https://cosaccela.seattle.gov> (ka firi qaybta +Create New (Samee Mid Cusub) kadibna dooro Complaint (Cabashada)). Caawimaada luuqada ayaa la heli karaa.

Si aad u hesho xogtii ugu danbaysay booqo seattle.gov/rentinginseattle
Nagasoo wac 206.684.5700

Ilaha kale ee Xogta COVID-19

www.seattle.gov/mayor/covid-19 sii aad u hesho ilaha xogta ee bulshada.
2-1-1 si aad u hesho xog ku saabsan caawimaad dhaqaale iyo baahiyaha aasaasiga ah.
<https://esd.wa.gov/newsroom/covid-19> for unemployment insurance info